

**ARC oo soo saartay warbixin
sannadeedkeedkeeda 2021**

Hay'adda gargaarka Afrika (ARC), waxa ay soo saartay Warbixin sannadeedkeedii 2021 oo ay kaga hadlayso waxqabadkii iyoguulihii aykaasoo hoysay hawlaho baniaadannimo, samafal, horumarineed iyo barnamajiyada arrimaha bulshada ee ay ka hirgeliso dhammaan gobollada iyo deegaannada Soomaalida ee Geeska Afrika. Warbixintaas oo ku diyaarsan afaaka Soomaaliga iyo Carabiga.



Eeg bogga 6aad>>

**Ceel-riig biyo macaan leh oo laga hirgeliay
deegaanka Botor ee gobalka Gebiley.**



Eeg bogga 3aad>>



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

CHARITABLE PATHS



Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC
FEB 2022 - CADADKA 6 - JANUARY, SOMALILAND



Eeg bogga 2aad>>

ARC: Kulan-Hawleed Lagaga Hadlay Qorshe Istaraatijiyadeedka Shanta Sanno Ee Soo Socda

Ceel Biyood iyo Masaajid Laga Hirgeliyey
Degmada Afgaoye



Bogga 3aad

Shirka Qaran Ee Horumarinta
Waxbarashada JSL



Bogga 4aad

Waaxda Xisaabaadka Ee ARC Oo La
abaalmariyey



Bogga 2aad

ARC oo Ka Qaybgashay Kulanka Heer
Qaran Ee Gurmadka Abaaraha



Bogga 2aad



Ardayda Dugsiyada Ay Gacanta Ku
Hayso ARC Oo Dib Uga Soo Noqday
Fasax Sannadeedkii



Hargeysa - Furitaanka sadex xarumuud
ee xiftiga Qur'aanka Kariimka

GUDAHKA AKHRI



Bogga 3aad

Dhagax dhigga dhismeyaal lagu
kordhinayo dugsiga Hablaha Alnuur,
Boorama



Bogga 4aad

Boorama waxaa laga furay moof looga
faa'ideeyo daryeekla agoonta

Dhismaha xarunta agoomaha ee magaalada Boorama - bogga 4aad
Abaalmarinta Hindiseyaasha iyo Afkaarta Hal-abuurka Leh bogga 7aad

ARC: Kulan-Hawleed Lagaga Hadlay Qorshe Istaraatijiyyadeedka Shanta Sanno Ee Soo Socda



Maamulka sare iyo guud ahaan hawladeennada hay'adda ARC ayaa Bilowga sannadka cusub ee 2022 isugu yimi kulan-hawleed ballaahan oo lagu iftiiminayo qorshe istaraatijiyyadeedka ARC 2022 – 2025. Guddoomiyaha guud ee hay'adda mudane Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa hawladeennada u jeediye hadallo dhiirrigelin ah, isaga oo ku guubaabiye in sannad ka cusub ay himiladooda kor u qaadaan, hal-adayg iyo dadaal kii hore ka sii badanna ugu hawlgalaan in si xirfad iyo aqoon sare ku dheehantahay ay raad ugaga tagaan dadka saboolka ah ee la caawinayo.

Guddoomiyuhu waxa uu munaasabadda kaga dhawaaqay laba hindise oo cusub oo shaqaalaha lagu dhiirrigelinayo, kuwaas oo kala ah; in la abaalmarinayo cidda keenta fikiradda hal-abuur ee ugu fican ee horumarinta shaqada iyo ka midho dhalinteeda. Qorshahan ayaa ah in qofka shaqaalaha ahi uu maamulka u soo gudbinayo fikir maangal ah oo la fulin karo, kuna jirto danta hay'adda, hawladeennada iyo bulshaduba. Hindisaha labaad ayaa ah, 'Abaalmarin la siinayo qofka baraha bulshada ku faafiya farriinta ugu togan ee ku aaddan hay'adda iyo hawlaha samafal ee ay qabato' farriintaas oo

tirada ugu badan ee bulshada ka hesho soo dhoweyn iyo ka dareen celin. Tartankan ayaa uu guddoomiyuhu sheegay in uu yeelan doono waqtii xaddidan iyo shuruudo iyo halbeegyo la gaadhsiin doono shaqaalaha oo dhan. Dhinaca kalana mudane Mucallimi waxa uu tirihey tirakoobyada guulaha ay hay'addu ka gaadhad mashaaariicda kala duwan ee ay ka shaqayso. Isaga oo ka hadlay waxyaabaha ugu muhiimsan ee ku jira qorshaha istaraatijiyyadeed ee afarta sano ee soo socda 2022 – 2025, yoolasha ugu waaweyn, meelaha ay ku jihaysantahay, hal-ku-dheggeeda iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah guusheeda. Waxaa iyaguna munaasabaddan ka hadlay Mudane Ciid Cabdilladiif, madaxa mashaariicda waxbarashada iyo Barbaarinta ee heer gobal, waxa aanu caddeeyey muhiimadda ay leedahay in la dejiyo qorsheyaal kor loogu qaadyo hawlaha waxbarashada ee ka socda xarumaha kala duwan ee goballada ay hay'addu ka shaqayso iyo guud ahaanba mashaariicda ay hay'addu waddo. Waxa isaguna hadal kooban ka jeediye munaasabaddan Mudane Xuseen Mutawali, maamulaha mac-hadka farsamada gaacanta ee xarunta Alkuweyt, isaga oo bogaadiyey dadka soo diyaariiyey qorshe istaraatijiyyadeedkan afarta sano ah.

Waaxda Xisaabaadka Ee ARC Oo Lagu abaalmariyey – Isticmaalka Barnaamijka Dynamics



Guddoomiyaha guud ee hay'adda Samafalka Afrika (ARC), Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa waaxda xisaabaadka ee hay'adda guddoonsiyyey shahaado sharaf ay ku mutaysatay kaalinta sare ee ay ka gashay ku shaqaynta Barnaamij xisaabeedka 'Dynamics'.

Waaxda maaliyadda ee ARC ayaa kaalinta labaad ka gashay liiska ku shaqaynta wanaagsan ee barnaamij xisaabeedka Dynamics ee xafiisyada hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ay ku leedahay dunida oo dhan.

Mudane Mucallimi oo hadal ka jeediye munaasabab kooban oo sabtidii 5-ta Feberuary 2022, xarunta ARC uu shahaado sharafta ku guddoonsiinayey waaxda xisaabaadka, waxa uu sheegay sida uu ugu faraxsan yahay sarraynta shaqo ee waaxda xisaabaadka. Waxa aanu u rajeehey in ay sii wadaan horumarka iyo hal-abuurka shaqo ee ay abaalmarintak u mutaysteen, isaga oo hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay horusocod joogto ah oo lagu hirgeliyo iskaashi wadareed, iyo in laga gudbo caqaba-

daha, si guusha hore loogu gaadho. Kaaliyaha agaasinka guud iyo waaxyaha Arrimaha maaliyadda, iyo cuuddu shaqaalaha ee Kuweyt, ayaa iyaguna xafiiska ARC ku bogaadiyey maamuusidda shaqowanaagga iyo waxqabadka waaxda maaliyadda.

Dhinaca kalana guddoomiyeh Muclimi waxa uu waaxda xisaabaadka ARC soo gaadhsiyey hambalyo iyo bogaadin uga timid maamulka waaxda Afrika ee hay'adda ALRAXMA iyo sida oo kale golaha sare ee ARC.

maamulaha waaxda xisaabaadka ee ARC, mudane Axmed Cabdiladiif oo isaguna munaasabadda ka hadlay ayaa sheegay farxadda ay isaga iyo hawladeennada waaxdaba u tahay maamuusiddani, waxa aanu hoosta ka xariiqay in guushani ay ku timi iskaashiga iyo shaqo-wadareedka waaxda.

Munaasabadda waxa kale oo ka soo qaybgalay maamulaha iyo hawladeennada waaxda xisaabaadka ee xarunta dhexe ee Hargeysa, Somaliland.

ARC Waxa Ay Ka Qaybgashay Ku-lanka Heer Qaran Ee Gurmadka Abaaraha

Masuuliyiin ka socota hay'adda gargaarka Afrika ayaa ka qaybgalay kulan heer qaran ahaa oo lagaga wada hadlayey u diyaargarowga hawlgaha gurmadka degdegga ah ee la gaadhsiinayo dadka ay abaaruuhu wax yeelleeyeen. Kulankan oo uu isugu yeedhay madaxweyne ku xigeenka Somaliland mudan Cabdiraxmaan Cabdillaahi Saylici, waxaa lagaga wada hadlay hannaanka iskaashi ee loo mari karo dadaallada gurmadka degdegga ah ee abaaraha waqtigan ka jira dhul ballaadhan oo ka mid ah Somaliland. Kulanka waxaa ARC ku metelayey Madaxa waaxda mashaariicda, Mudane Cabdarxmaan Al-Thaamir iyo agaasi-maha xidhiidhka dadweynaha ee ARC, waxaa iyaguuna ka soo qaybgalay madax, masuuliyiin iyo wakiillo ka socda hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee ka shaqeeya Somaliland.





Ceel Biyood Iyo Masaajid Laga Hirgeliyey Degmada Afgooye

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa xadhiga ka jartay Masaajid iyo ceel-qacmeed biyo macaan leh oo loogu magacdaray marxuum Rashid Mubaarak Al Shammrowkh. Masaajidkan iyo ceelka ayaa laga hirgeliyey degmada Afgooye ee gobalka Shabeelaha hoose ee Soomaaliya.

Ceelkan ayaa waxaa ka faa'iidaysan doona dad ay tiradoodu ka badan tahay kun qoys oo deegaankaas ka mid ah. dhinaca kalana masajidka waxaa halkii mar ku tukan kara 162 ruux.

Ceelbiyood Gebiley Laga Hirgeliyey



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa xadhiga ka jartay ceel-riig, biyo macaan leh oo ay ka hirgelisay deegaanka Botor ee gobalka Gebiley.

Ceelkan oo loogu magacdaray Alle ha ka raalli ahaado ee asxaabigii Jacfar Bin Abi Daalib, waxaa raacsan nidaamka biyo-soo-tuuriista oo ku shaqaynaya korontada cadceedda laga dhaliyo (Solar), kayd biyood qaadaya 180 meter, dar-biyood ka ilaashan bakteeriyyada oo ay dadku ka cabbayaan iyo darar Xoolaha laga waraabinayo.

Waxa mashruucan ka faa'iiday-san doona in ka badan 1500 oo qoys oo qoys, kuwaas oo celcelis ahaan noqonaya 10 kun oo muwaadin, iyo sida oo kale dadka deggen shan tuule oo ku dhow deegaanka ceelka laga qoday.

Xadhig ka jaridda ceelka Jac-

far Bin Abi Daalib waxaa ka soo qaybgalay xoghaya gobalka Gebiley mudane Cabdiraxmaan Nuux Dhidhar, isu-duwaha wasaaradda biyaha ee gobalka Ahmed Cismaan iyo qaybo ka mid ah masuuliyiinta deegaanka iyo bulshada rayidka ah.

Mudane Cabdiraxmaan Dhidhar oo goobtan hadal kooban ka jeediyey ayaa hay'adda ALRAXMA uga mahadnaqay maalgelinta, sida oo kalana Isuduuhaha wasaaradda horumarinta biyaha ee gobalka Gebiley ayaa soo dhoweeley celbiyoodkan oo uu sheegay in uu yahay meel aad ugu habboon, marka la eego baahida biyood ee ka jirta deegaankaas.

Ceelkani waxa uu qayb ka yahay mashraaciida samafal ee ay hay'adda ARC ka fuliso Somaliland, kuwaas oo ay maalgeliso hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

Guddoomiyaha hay'adda ARC Cabdiraxmaan Almuallimi oo isaguna munaasabadda ka hadlay ayaa hay'adda ALRAXMA uga mahadnaqay maalgelinta ceelkan iyo guud ahaan hawlahaa samafal ee ay ARC ka hirgeliso Somaliland. Waa uu intaas ku daray in ceelasha ay ARC qoddo oo biyo nadiifa laga soo saaraa ay kaalin weyn ka qaadanayaan caafimaadka guud ee bulshada gaar ahaan Dhallaanka, Haweenka iyo dadka da'da ah.

Dad u badan haween iyo caruur ka mid ah deegaanka ceelkan laga qoday ayaa damaashaad iyo farxad ku soo dhoweeley celbiyoodkan oo wax badan ka tari doona baahida biyood ee deegaanka Botor, gaar ahaan xilliya-



Guddi Ka Socota ARC oo booqasho indha-indhayn ah ugu tegey shirkadaha soo dalbaday qandaraaska dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah

Guddida farsamo oo ka tirsan waaxyaha iibka iyo xeeldheereyaasha mashaariicda dhismaha ee hay'adda gargaarka Afrika ayaa booqasho ugu tegey shirkadaha soo codsaday qandaraaska dhismaha cusub ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa. Guddidu waxa ay soo indha-indheeyeen hannaanka shaqo ee shirkadahan, iyaga oo hubin iyo dabagal ku sameeyey waxyaabaha ay codsiyadooda ku soo lifaaqeen ee ay ka mid yihin liisaska waxqabadyadooda hore iyo Sawirrada iyo nashqadaha hawla la midka ah dhismaha cisbitaalka ee ay

hore u soo qabteen, iyo sida oo kale liisaaka hawladeennada muhiimka ah ee far-samada iyo kuwa ku takhasusay hawlahaa dhisme ee noocas ah.

Bishii Oktoobar ee sannadkii 2021 ka ayaa ay hay'adda ARC ku dhawaaqday tartanka qandaraaska dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah iyo dhisme hoy ah oo laga hirgelinayo xaafadda Masallaha ee magaalada Hargeysa, Somaliland.

Naadintan qandaraaslayaasha ayaa qayb ka ahayd dadaal ay ARC ku doonayso in ay hesho tirada ugu badan ee ah shirkadaha

dhismaha heerkoodu sarreeyo ee rukhsada shaqo ka haysta jamhuuriyadda Somaliland, iyo dalalka Carabta ama xitaa dunida kale. Waxa aanay shuruud kaga dhigtay halbeegyo injineeriyyadeed iyo farsamo oo aad u xeeldheer, casrina ah.

30 shirkadood ayaa soo xaraystay codsiyada qandaraaska, qiimayn ay guddi xeeldheereyaal ahi ku sameeyeen ayaana lagu soo xulay 12 ka mid ah shirkadahaas, si ugu dambaynta looga sii dhix saaro shirkadha mashruucaas dhisme qaadanaysa.

Dhismaha Moofada Burco - Somaliland

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa dhagaxdhigtay mashruuca dhismaha moofo loogu talagalay xarunta agoomaha ee magaalada Burco ee jamhuuriyadda Somaliland. Moofadan oo ka kooban qaybta foornooyinka, qolka khamiirinta, qolka qooshka, istoodh iyo xafiiska maamulka iyo kormeerka, ayaa qayb ka ah mashaariicda samafalka iyo Horumarinta ee ujeedooyinkooda ay ka mid yihin, shaqa-abuurka, quidunt ardayda hoyga xarunta waxbarashada deggen, gaar ahaan agoonta qaybaha kala duwan ee waxbarashada, oo ay ka mid yihin xarumaha waxbarashada, mac-hadyada farsamada gacanta, iyo sida oo kale in la hirgeliyo mabda'a ah isku filnaanshiyaha oo inta waxsoosaarka laga iibyo suuqyada maxalliga ah, dakhliga ka soo xarooda loo adeegsanayo horumarinta adeegyada samafal ee ay hay'adda ARC u hayso bulshada.

Mashruucani waxa uu ka mid yahay mashaariicda waxsoosaar ee ay hay'adda gargaarka Afrika ka fuliso magaalooyinka iyo deegaannada kala duwan ee Somaliland iyo Soomaaliya.

Waxaa xusid mudan in mashaariicda waxsoosaar ee hay'addan ay ujeedadoodu tahay in la helo hindise latu higsanayo in la abuuro fursado waxsoosaar oo ay ka mid yihin, beeraha, warshadaha, horumarinta iyo xirfada. Taas oo xoogga saaraysa daraasynta baahiyaha suuqyada maxalliga ah iyo waxsoosaarka si loo buuxiyo baahiyaha jira.



Dhagax dhigga dhismeyaal lagu kordhinayo dugsiga Hablaha Alnuur, Boorama

Waxaa la dhagaxdhigay dhismeyaal dheeraad ah oo ay hay'adda Gargaarka Afrika ku kordhinayso dugsiga hablaha ee xarunta waxbarashada Al-Nuur ee magaalada Boorama. Dugsiga oo ka mid ah Goobaha waxbarasho ee ay hay'adda ARC gacanta ku hayso ayaa lagu kordhinaya laba fasal oo qalabayntoodu u dhammaystirantahay, qol macallimiinta loogu talagalay iyo salaanka dabaqa sare ee dhismaha dugsiga.

Waxaa la filayaa in dhismahan iyo diyaarintisu uu dhammaysirmi doonto dabayaqa qadaa sannad dugsiyeedkan 2021/2022.



Shirka Qaran Ee Horumarinta Waxbarashada JSL

Maasuuliyyin ka socda waaxda waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa ka qaybgalay shirkha qaran ee Horumarinta waxbarashada Somaliland oo ka qabsoomay magaalada Hargeysa. Mudane Ciid Cabdilatiif, madaxa waaxda waxbarashada ee ARC iyo madaxa xidhiidhka dadweynaha ee waaxdaas mudane Yuusuf Cabdillaahi (Khidmo) ayaa hay'adda ku metelay shirkas oo mudodo saddex maalmood ah socday.

Shirkan oo sannadle ah waxaa sannadkan lagu dejinayey istaraati-jiyadda waxbarashada qaranka ee shanta sano ee soo socda 2022 – 2026, taas oo aasaas looga dhigay maamul-daadejinta iyo maamul wanaagga, fidinta waxbarashada oo ay ka mid tahay kordhinta dhismeyaasha dugsiyada iyo dhiirrigelinta waxbarashada Carruurta deggen dhulka magaalooinka ka fog.

Shirka oo uu furay madaxweyne ku xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Cabdiraxmaan Saylici waxaa ka soo qaybgalay wasiirka iyo masuuliyyinta wasaaradda waxbarashada iyo hay'adaha dawladda ee waxbarashada la xidhiidha, madaxda hay'adaha caalamiga ah ee waxbarashada ka caawiya Somaliland, madaxa hay'adaha qaadhaan bixiyeyaasha waxbarashada ee ku midaysan mashruuca (Global Partnership for Education -GPE), masuuliyyin



kale oo tiro badan oo ka tirsan bahda waxbarashada Somaliland iyo urururada maxaliga ee Somaliland.

Hay'adda ARC ayaa ka mid ah hay'adaha Caalamiga ah ee sida tooska ah uga qaybqaata waxbarashada Somaliland, waxa aanay gacanta ku haysaa dugsiyo hoose / dhexe iyo sare, xarumo waxbarasho iyo mac-hadyada farsamada gacanta iyo xirfadaha oo ku yaalla goballada dalka, kuwaas oo ay maalgeliso hay'adda ALRAXMA.

Boorama waxaa laga furay Moofo looga faa'iidayn doono daryeelka agoomaha



Waxaa xadhiga laga jaray moofada samafal iyo horumar ee ay hay'adda gargaarka Afrika u dhis-tay degsiimada iyo xarunta agoomaha ee magaalada Boorama, Somaliland. Mashruucan ayaa ka kooban moofada oo ku fadhida dhul bedkiisu yahay 200 oo

mitir, qolka cajiiinka / qooshka iyo khamiirinta, Istoodhka iyo iibka foorno ay u dhammaystiran yihi-in dhammaan qalabkii iyo agabkii ay u baahnayd ku jiraan. Waxaa xusid mudan in ujeedada mashruucan ay ahayd in la helo il waxsoosaar oo laga kaalmeeyo

baahiyaha agoonta ku xaraysan xarunta Alnuur ee Boorama, iyada oo uu waxsoosaarkeedu ka mid noqon doono cuntooyinkaa agoonta la siinayo iyo in la iibiyo dheeraadka si dhaqalahaa ka soo xarooda loogu daro baahiyaha maamul ee xarunta agoonta.

Dhismaha xarunta agoomaha ee Alnuur ee magaalada Boorama

Waxaa magaalada Boorama laga dhagaxdhigay dhisme loogu talagalay agoomaha oo ay hay'adda Gargaarka Afrika ka hirgelinayso meel ku dhow xarunta waxbarashada ee Boorama.

Dhismaha cusub oo ku fadhiya dhul Bedkiisu dhan yahay 750 mitir, wuxuu ka koobanyahay 4 dhisme oo ah hoyga ay agoonta degi doonto, Qolka kormeerka, Hoolka cuntaynta, Qolka duruus raacashada, Qolka kaydka (Bakhaar) oo si buuxda loo qalabeeyey iyo lix Xamaam.

Mudane Cabdiqadir Muxamed Axmed, kormeeraha

xafiiska Boorama ee hay'adha Gargaarka Afrika, ayaa sheegay in mashruucani uu marag u yahay muhiimadda ay dhinacyada hawshan wadaa siinayaan agoonta oo ah qayb bulshada ka mid ah oo u baahan daryeel, kaalmayn iyo diyaarin.

Dhinaca kalana waxa uu bogaadiyey iyo mahadnaq u diray cid kasta oo kaalmaysay ama gacan ka geystay hirgelinta mashruucan samafal, kuwaas oo uu ugu horreeyo Agaasinka guud ee awqaafta dalka Kuwetyl iyo hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



Furitaanka saddex Xarumood oo lagu barto Qur'aanka Kariimka ah



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa xadhiga ka jirtay saddex xaruumood oo cusub oo loogu talagay xifdigaa Qur'aanka Kariimka ah. Xarumahan oo kala ah; xarunta Ibnu Aljasari oo qaadaysa 29 arday, xarunta Al-Atrijah oo qaadaysa 29 arday iyo xarunta Alkuweyt oo qaadaysa 57 arday, waxa ay qayb ka yihiin barnaamijka Al-Shafii oo loogu talagay xifdigaa Qur'aanka Kariimka ah, Barashada culuumta iyo fahamka Qur'aanka iyo barbaarin-ta wanaagsan. Mashruuca dhismaha xaruma-

han waxaa maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee Alkhayriya Al-Islaamiya ee dalka Kuweyt. Wuxa aanu ku dhisan istaraatiji-yad ah in muddo aan 4 sano ka badnayn qur'aanka Kariimka ah lagu xifidiiyo ardayda da'da toddoba jirka gaadhay. Mashruuucan ayaa ay ujeedadiisu tahay daryeelka iyo in si waafaqsan shareecada islaamka loo barbaariyo bulshada soo kacaysa, iyo sida oo kale in laga qaybqaato kor u qaadista heerka xafidista Qur'aanka Kariimka ah iyo Barashadiisa.



Ardayda Dugsiyada Ay Gacanta Ku Hayso ARC Oo Dib Uga Soo Noqday Fasax Sannadeedkii



Arday tiradoodu ka badan tahay 9 kun ayaa 2dii Jeenaweri 2022, dib ugu soo noqday dugsiyada ay gacanta ku hayso hay'adda Gargaarka Afrika, kaddib markii ay soo dhammaysteen fasaxii weynaa ee sannad dugsiyedkii 2020 / 2021.

Dugsiyada ay maamusho ARC ayaa sannad dugsiyedka cusub ee 2021/2022 waxa ay ardayda ku qaabileen tallaabooyin cusub oo

lagaga hortegayo faafitaanka 'Coronavirus'; kuwaas oo ay ka mid yihiin in lagu adkeeyey istiemaalka af-xidhka, isticmaalka jeermis dilaha gacmaha iyo kala fogaanshiyaha. Masuuliyyiin kala duwan oo ka socda waaxda waxbarashada ee ARC ayaa booqashooyin indha indhayn ah ku tegey dugsiyada kala duwan ee hay'addu maamusho si ay u kor-meeraan habسامي u bilowga sannad-dugsi-

yeedka cusub.

Maamulka xarunta waxbarashada ee Kuweytiga sheegay in ay dadaal geliyeen u diyaargarowga iyo qaadista tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah soo dhoweynta ardayda, si loogu suurtageliyo jawi caafimaad qaba, isla markaana aamin u ah ardayda iyo guud ahaanba hawladeennada waxbarashada.

IN KA BADAN

977,257

QOF OO KA FAA'IDAYSTAY
MASHAARIICDAYADA

IN KA BADAN

139,605

QOYS OO KA FAA'IDAYSTAY
MASHAARIICDAYADA

Mashaariicda Dhismaha

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 2 Dugsiyo
- 2 Xarumaha barashada xirfadaha
- 7 Xarumaha xafidista Qur'aanka
- 1 Dhagaxdhigga cisbitaallada
- 1 Dhismaha rugaha Caafimaadka
- 1 Dhismaha Xarumaha dhaqanka
- 33 Dhismaha Masaajidda
- 1 Ka qaybqaadashada dhismaha Masaajidd

Kolonyooyinka iyo Ololeyaasha caafimaadka

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 1606 Qallinada Indhaha
- 142 Qallino kala duwan
- 1 Gaadhi Curyaan
- 12 Kolonyo caafimaad (Kooxo u socdaala obole caafimaad)
- 8 Diyaarin, Qalab iyo agab caafimaad
- 3 Mashaariic caafimaad oo kala duwan
- 31 Tababarka ardayda ka qalinjebisa kulliyadaha caafimaadka

Mashaariicda Waxbarashada

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 3 Hawlgelinta xarumaha waxbarashada (Mujamacyada)
- 15 Hawlgelinta xarumo waxbarasho oo cusub
- 57 Mashaariicda kale ee waxbarashada
- 3 Maamulka hoyga ardayda
- 8 Tababarka iyo kobcinta Macallimiinta
- 9410 Tirada ardayda dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada

Mashaariic xilliyeedka

Tirada
Ka faa'idayste Magaca mashruuca

- 328281 Mashruuca odxada
- 190864 Mashruuca afurinta
- 3318 Gurmadka dadka daadadku wax yeelleeyeen
- 48000 Booyadu biyo ah oo loo qaybiyey dadka abaaruuhu waxyeelleeyeen
- 3298 ka faa'iidystayaasha Dharka Ciidda

Tababarka iyo Dhisida Awoodda

Tirada
koorsooyinka Tirada
ardayda Magaca mashruuca

- 5 250 Tababarka iyo aqoonta shaqaalaha
- 11 2035 Tababarka macalinka (koorsooyin xilliyeed)
- 11 344 Tababarka farsamada qacanta iyo xirfadaha
- 6 92 Tababar caafimaad
- 8 240 Tababarka farsamada gacanta ee gabdhaha aqoon-is-weydaarsi
- 8 120 Ka qaybqaadasho qodaalka ceelasha mashaariicda biyaha
- 3 26 Koorsooyinka dibadda

47 Wadarta
mashaariicda

126,476 Ka faa'idayste

1772 Wadarta
mashaariicda

38,820 Ka faa'idayste

28 Wadarta
mashaariicda

14,955 Ka faa'idayste

305 Wadarta
mashaariicda

628,377 Ka faa'idayste

52 Wadarta
koorsooyinka

3,107 Tirada ardayda la tababaray

642 Wadarta
mashaariicda

25,473 Ka faa'idayste

24 Wadarta
mashaariicda

10,606 Ka faa'idayste

10 Wadarta
mashaariicda

6,665 Ka faa'idayste

144 Wadarta
mashaariicda

122,778 Ka faa'idayste

A.R.C

Nagala soco

Mashaariicda kobcinta iyo horumarinta

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 2 Qalabaynta, diyaarinta iyo ka shaqaysiinta
- Moofootinka
- 25 Lo' Irmaan oo la qaybiyey
- 64 Gaadhi Gacan cuntada lagu iibyo (Buudhi Taayirro leh)
- 42 Meherad Ganacsi (Booshari iwm...)
- 111 Miis ganacsi (Cunto / Miis khudradeed / Miis dhar)
- 146 Shandad qalab-gacmeed (Tool: Nijaaradda/Tumaal/Koronto)
- 147 Makiinado Dawaar
- 103 Xoolayn (Deeq Adhi ah)
- 2 Hawlgelinta Beero waxsoosaar (Beer / xoola dhiqid)

Mashaariicda bulsho

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 1285 Soo iibinta iyo qaybinta Kutubta Qur'aanka iyo kutub Islaamiya
- 16 Guryo loo dhiso saboolka
- 199 Kafaara iyo Nidar gud
- 965 Qallino wanqal iyo duco
- 83 Sadaqooyin, sakoooyin, kafaaragud, masaakiin quudin

Mashaariicda kafaalaqaadka iyo daryeelka

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 2626 Kafaalaqaad agoon
- 1709 Kafaalaqaad Arday dugsi
- 20 Kafaalaqaad Arday Jaamacadeed
- 3 Kafaalaqaad arday waxbarasho sare
- 70 Kafaalaqaad arday qur'aan xafid
- 315 Kafaalaqaad Qoys
- 28 Kafaalaqaad diin faafiye
- 1 Kafaalaqaad Bare
- 1 Kafaalaqaad Imaam Masjid
- 2 Kafaalaqaad macallin qur'aan

Mashaariicda Biyaha

Tirada
mashaariicda Magaca mashruuca

- 3 Ceelal Riig ah
- 16 Ceel dheer (Riig aan dheerayn)
- 122 Ceel Gacmeed
- 3 Ka qaybqaadasho qodaalka ceelasha mashaariicda biyaha

Abaalmarinta Hindiseyaasha iyo Afkaarta Hal-abuurka Leh

Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika waxa uu bilowgii 2022 ku dhawaaqay in la abaalmarin doono, ciddii hawladeennada hay'adda ka mid ah ee keenta hindise iyo aragti hal-abuur oo waxtar u leh shaqaalaha iyo bulshada, isla markaana wanaajinaya jawiga guud ee shaqada.

Qeexda abaalmarinta:

Waa abaalmarin la siinayo qof ama wadar kasta oo ka mid ah hawladeennada hay'adda oo keena aragti iyo afkaar ama mashruuc hal-abuur oo waxtar u leh hay'adda ama / iyo bulshada, lana fulin karo.

Yoolka abaalmarinta afkaarta hal-abuurka leh

- 1.In la godliyo hindiseyaasha iyo hal-abuurka ku jira maskaxda hawladeennada.
- 2.In la abuuro tartan togan oo shaqaalaha dhex mara.
- 3In la abuuro jawi shaqo oo niyadwanaag iyo dhiirrigelin leh.
- 4.In la kordhiyo isku xidhnaanta iyo iskaashiga hawladeennada, iyada oo loo marayo in la dhegeysto, lana xoojiyo afkaartooda iyo taladooda.

- 1.Waxaa la soo gudbinaya Fikirka ama mashruuca oo ah qoraal ,si faahfaahsan oo sawir dhammaystiran ka bixinaya dhammaan dhinacyada mashruuca ama fikirka.
- 2.Waa in uu noqdaa mashruuc la fulin karo oo aan ka baxsanayn xayndaabka tamarta hay'adda iyo awooddeeda.
- 3.In uu yahay hal-abuur uu hawladeenka (Kooxda) soo dalbaday maskaxdiisa ka soo miiray, oo aanu ka soo dheegan ama ka soo naqlin dhinac kale ama dad kale.
- 4.Mashruuca waxaa la soo raacinaya dhammaan dhukumantiyada looga baahan yahay iyo lifaaqyada caawinaya in laga midha dhaliyo.
- 5.Hal-abuurkan iyo fikirkiisa ayaa si kooban loogu soo bandhigayaa hay'adda 'ARC' iyada ayaana xaq u leh in ay diiddo iyo in ay qaadato.

- 1.Dhammaan mashaariicda iyo fikradaha hal-abuur waxaa loo gudbinaya qaybta cududda shaqaalaha, iyada oo loo marayo jidka iyo hannaanka uu xafiiska shaqaaluhu sheegi doono.
- 2.Guddoomiyaha guud ayaa magacaabaya guddi ka kooban 3 xubnood oo qiimeeya codsiyada.
- 3.Guddidaasi waxa ay shaqada qiimaynta bilaabaysaa ugu yaraan hal toddobaad kaddib marka fikirka fikirka iyo hal-abuurka loo dhiibo.
- 4.Haddii cadayn dheeraad ah loo baahdo, qofka codsiga keenay waxaa ku waajibaya in uu faahfaahinta iyo caddaymaha loo baahanyahay u soo gudbiyo si waafaqsan habraaca iyo hannaanka ay guddida qiimayntu dejiso.
- 5.Hay'addu waxa ay soo saaraysaa warbixinteeda ogolaanshiyaha ama diidmada mashruuca iyada oo raacinaya sababaha ay u cuskatay iyo waxyaabaha xoojinaya diidmadeeda ama ogolaanshiyaaheeda.
- 6.Haddii mashruuca la aqbalo, hay'adduna go'aansato in ay suuqgeyso fikirkaas, waxaa loo marayaan hannaan ay isla ogolyihiin hawladeenka oo lagu maamulayo dhammaan qaybihiisa kala duwan.

Qaddarka abaalmarinta waxaa jaangoynaysa hay'adda ARC oo talo iyo xidhiidh kala samaynaysa maamulkeeda sare.

Boosas Shaqo oo bannaan

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC)

Magaca Booska: Xoghayaha Arrimaha Waxbarashada
Goobta Shaqada: Waaxda Waxbarashada ee ARC

shuruudaha:

- Inuu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland.
- Daada Aan ka yarayn 25 sano oo aan ka badnayn 35 sano.
- Luuqadaha Carabiga iyo Ingiriisiga si fiican u yaqaan marka laga reebo Soomaaliga (akhrinta, qorista iyo ku hadalka).
- Awoodda lagu diyaariyo warbixinnada maamulka oo looga shaqeeyo barnaamijyada Microsoft si xirfad leh (word- excel - powerpoint.. etc)
- Waa inuu leeyahay khibrad shaqo oo la mid ah ugu yaraan 4 sano.
- Aqonta tacliinta: Shahaadada koowaad ee jaamacadda.
- Shahaadada anshaxa wanaagsan

Qaabka codsiga:

Ciddii shaqadan xiisaynaysa ee shuruudaha buuxisay arjiga codsiga oo ay ku lifaaqanyihiin
-Taariikhdeeda shaqo (CV)
-Nuqullada shahaadooyinkeeda waxbarasho iyo caddaymaha waayoaragnimo
Ha ku soo dirto Email ka Hrsom2020@gmail.com
Inta ka horreysa maalinta Isniinta ee 17 February

Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH)

Shaqo ka bannaan cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa
Hargeysa International Hospital (HIH)

Nooca shaqada: Kalkaaliso caafimaad (Umuliso)

Shuruudaha

- In ay haysato shahaadada koowaad ee jaamacadda oo umulisonimo ah
 - In ay waayoaragnimo aan 2 sanno ka yarayn u leedahay shaqadan
 - In aanay da'deedu ka weynayn 35 sano jir.
 - In ay dulqaad u yeelan karto culayska shaqada.
 - In aanay shaqo kale haynin.
- In ay ku fiicantahay ku hadalka Carabiga iyo Soomaaliga.

Qaabka codsiga

Ciddii shaqadan xiisaynaysa ee shuruudaha buuxisay arjiga codsiga oo ay ku lifaaqanyihiin
-Taariikhdeeda shaqo (CV)
-Nuqullada shahaadooyinkeeda waxbarasho iyo caddaymaha waayoaragnimo
Ha ku soo dirto Email ka arc.hil.hr@gmail.com
Inta ka horreysa maalinta Isniinta ee 14 February